

086878A

C6071A

100

POLITIETS EFTERRETNINGSTJENESTE  
DANISH SECURITY AND INTELLIGENCE SERVICE



Taageeridaada  
si xun baa loo  
isticmaali karaa

KRONER

CARL NIELSEN

*Nils Bruun*

1.

## (Lacag) Aruurin taageero fiican



Danmark waxay leedahay dhaqan dheer oo fiican sida aruurinta caawimaada lacagta, taasoo u leh faa'iido ama waxtar ururada waaweyn iyo kuwa yaryarba, si ay ugu fuliyaan shaqadooda.

Waxaanu arurina haday dhacdo masiibo ama dhibaato degdeg ah. Sidii dhibaatooyinkii ka dhacay, tusaale ahaan, sidii badii kacday/fatahday, sidii koonfurta bari Aasiya sanadkii 2004 iyo dhulgariirkii ka dhacay Bakistan sanadkii 2008.

Waxaanu markasto lacag caawimaad ah aanu u ururinaa ururada, xafladaha xuska ah iyo xafladaha

khaas ah. Sida xafladaha dabaaldega ah, oo markasto laqabto ku saabsan bulshada diinteeda, sida tukashada kaniisadaha iyo tukashada masaajidka jaamaca.

Lacagtaan waxay ka timaada dawladda iyo dadweeynaha. Aad bay u muhiim tahay taageeradeena ama caawimaadeena, si ay ururado dhaqaale ay u helaan oo ay ugu fuliyaan shaqadooda ama mashruucyadooda.

Waa dhaqan fiican oo ujeedo aad u muhiim leh, inaanu dad kale caawino. Waana muhiim inaanu si joogta ah u taageerno.

“Wadanka Denmark waaxa dhaqan iyo hab fiican loo leeyahay, in la aruuriyo lacag lagu caawinayo ururadda.”



## 2. Taageerida ururada argagaxisada



Sanadahii danbe waaxa dhacday, mararka qaarkood in lacagtii caawimadda loo aruuriyay, ay qaateen dad qalad ah, oo lagu taageerayo argagaxisada, si toos ah ama si qarsoodi ah.

Waxaa si waayo aragnimo ah, loo ogyahay in ururada loo bilaabo, si loo taageero argagaxisada xagga dhaqaalaha si toos ah, ama si qarsoodi ah. Wadamada EU. iyo UN. Way ka warqabaan dhibaataada.



Wadanka Denmark waxaa laga sameeyey sida, wadamada kale, sharci aan ogoleyn in la aruuriyo ama la diro, ama la siiyo lacag iyo wax qiimo leh, in la siiyo dad ama ururo lagu taageerayo dhaqdhaqaaqa argagaxisada.

## Waa denbi xukumaad haddii la taageero ururada argagaxisada

Taageerida argagaxisadu dhib bay keeneysa. Xukumaad xabsi ah, ayey leedahay:

- § **Haddii lacag** la siiyo qof ama urur, ama wax la mid ah oo taageersan ama ka qaybgala dhaqdhaqaaqa argagaxisada.
- § **Haddii lacag la ururiyo** lagu taageerayo qof ama urur ama wax isku mabda ah, oo taageeraya dhaqdhaqaaqa argagaxisada.
- § **Haddii wax qiimo leh** oo lagu taageerayo, la siiyo qof ama urur taageersan, dhaqdhaqaaqa argagaxisada.
- § **Haddii dayn la siiyo** qof ama urur taageersan, dhaqdhaqaaqa argagaxisada.
- § **Haddii la taageero mashruuc** si qarsoodi ah oo xubina laga yahay abaabulka/dhisida uruur argagaxisa ah.

Sharciga waxaa laga helayaa qodobka dembiilaha § 114

3.


### Qorshaha argagaxisadu waa qaali

Argagaxiso waxay is diyaariyaan muddo dheer, waxayna isticmaalan qarash badan.

Argagaxisadu waxay u baahan yihiin lacag kasta, euro, dollar, iyo kroner, iyo wax kastoo la arurin karo, oo ay ku isticmaalaan dhaqdhaqaaqa denbiyada, laakiin qorshahooda marmar way iska dhaafan, waayo ururada ka danbeeya ayaan dhaqaale haysan, ay ku fuliyaan ujeedada ay leeyihin.

“Haddii aad ka shakisantahay, meesha ay lacagtaadu marayso, ama sida loo isticmaalo, iska sug, intaad iska habsaneyso.”

9658745213568865646655915476  
36274897457632479  
564645646843516387656554  
57632479  
46446546513890653656565  
336236351565365535536595365  
574897457632479915476




4.

## Lacagtaada si sax ah u isticmaal



Adiga iyo ururkaaga, waxbaad ka qaban kartaan, inaad jojisaan lacagta loo aruurinaayo dad ujeedo iyo indho argagaxiso leh.



€ Isticmaal caqligaaga iyo maskaxdaada.

€ Haddii aad shaki ka qabtid oo aanad o'ogeyn, dadka qaadanaaya ama waxa lagu subinaayo lacagtaada, iska heeyso lacagtaada inta aad ka ogaanaysid xaalada.

€ Weydii ururka ama qofka, haddii aanad ka helin warbixin fiican, markaad lacag bixinaysid. Ka codso ururka xisaab xirka ama weydii homepagekooda.

€ Tusaale ahaan waydii ururka in aad ku bixisid caawimadaada homepagekooda, ay soo ogolaatay xaafiiska CANSHUURAADKA, waxaa heshiis ka dhexeeya bostada, baankiga iyo xaafiiska CANSHUURAADKA.

€ Soo baar ujeedada ururada iyo kuwa la shaqeeya iyo madaxdooda, lacagta la aruuriyo waa inay soo aqbalaan askarta degmada, si loo habsado in ururku yahay mid sharciyeesan.

€ Waaxaad kala soo xiriiri kartaa ururka qaabilsan uruurinta lacagaha caawimada ISOBRO. Haddii shaki aad ka qabtid in ururka lacagta ururrinaaya aanu waafaqsaneyn sharciga u yaala ururka ISOBRO ee telefoonkiisu yahay ☎3635 9622 ama homepage [www.isobro.dk](http://www.isobro.dk).

€ Fiiri liiska CANSHUURAADKA ay sanad walba soo saaran oo ay ku qoran yihin ururada caawimada ama kuwa diiniga ah ee la aqbalay, kuna yaala Denmark iyo EU. Liiska waxaa laga heli karaa homepageka [www.skat.dk](http://www.skat.dk)

€ Waxaad kaloo baari kartaa in ururka ama qofka, aad taageereyso ama lacag u ururinayso uu ku jiro liiska argagaxisadu ee EU. Liisgaan waxaad ka heli karta homepageka PET [www.pet.dk](http://www.pet.dk)

“Sannadihii danbe waxaa dhacday,  
in mararka qaarkood lacagaha  
caawimadu, ay gacmo khalad  
ah ku dhacaan.”

25414699658745213568865646655915476565545436274897457632479  
215488956464564681054698765655105436274897457632479  
68545654644654654389865365656564487898362353545653553659536  
53653344574897457632479915476565545436274897457632479  
5213568865646655910546987656551054362748974  
685456546446546543898653656565644878983623535456535536595  
36536533445748974576324799154765655



Qaybta boliiska ah ee qaabilsan baaritaanka  
(sirdoonka)  
Iyo nabadgelyada Denmark (PET)  
Waxay la shaqeeyan ururka lacag aruurinta  
Caawimada ee (ISOBR0)

**Taageeridaada si xun baa loo isticmaali karaa**

Layout KP2 A/S  
Trykkeri Rosendahls

Booliiska baarinta iyo nabadgelyada  
Klausdalsbrovej 1  
2860 Søborg  
Tlf. +45 33 14 88 88  
pet@pet.dk  
www.pet.dk